Sayid-Ahmed M Yuusuf Yuusuf (Dhegey)

# Milicsiga Dagaalkii Dhexmaray Xukuumaddii Maxamed S. Barre iyo Jabhaddii SNM

## Sababihii Dagaalka iyo Saamayntii

Maansada Heeliyo (1981kii Muqdisho)

*Hadimada Garoowiyo*
*Hanaq go'a Nugaaleed*
*Halka aad tumaatidey*
*Waxa kaga habboonaa*
*Dar kaloo i hawlee*
*Huqdaad reebtay weynaa*
*Hibashiyo Ladh kululaa*
*Colka Bari Harraatiyey*
*Hubka Mudug ku talax tegey*
*Allaylehe hubsiimiyo*
*haki buu u baahnaa*
Maxamed Ibraahin Warsame (Hadraawi)

Maansada Dhederbi (1988-kii)

*Dhederbiga dadweynuhu*
*Duufaanka kama dhaco*
*Doonyaha dhirbaaxee*
*Waxba daadka dhirifkii*
*Moosaskiyo dhufayskiyo*
*Dhacantiyo gidaarrada*
*Dhaadheer ka boodee*
*Shalay dhuun-castii Golis!*
*Iyadooy dharaar tahay*
*Xarumaha dhexdoodii*
*Ka dhufsaday ma maqasheen*

Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye)



*Aan direyska jamannee*
*Dirka maradu leedahay*
*Duni yaanay nagu hadhin*
*Marka salabku deeddamo*
*Daran doorri laba dhaco*
*Ardadaa dillaantee*
*Dadku haysu boodee*
*Ku dalbada hubka is wada*
*Dawersaad ku dhaqantaa*
*Dixda dhagaxa yaalliyo*
*Dogob aan ku furannoo*
*Farsamooyin dayannee*
*Keen dabaabadii hadhay*

*Maansadii Daalaley 1987kii*[1]
*Maxamed Ibraahin Warsame (Hadraawi)*

---

[1] Buugga Hal ka haleel, Maxamed Baashi Xaaji Xasan

# HIBEYN

Waxa aan buuggan u hibeeyey Ilaahay ha u naxariistee Ismaaciil Xaaji Cabdi X. Abokor. Waxa uu ka mid ahaa odayaal lagu xidhay Jeelka Mandheera 1982kii. Waxa sabab looga dhigay muddaharaad ka dhacay magaalada Burco bishii Mey 1982kii, oo lagu taageerayey dhagax-tuurkii ka dhacay Hargeysa 28 Feberweri 1982kii. Ismaaciil Xaaji Cabdi, waxa uu bishii May ee gu'gaas ku sugnaa Burco, waxaana markiiba la geeyey jeelka Mandheera, iyada oo aan wax maxkamad ah la saarin. Ismaaciil waxa uu muddo dheer ka soo shaqeeyey Idaacadihii dalka gaar ahaa Raadyaw Hargeysa, oo uu 1961kii shaqada ka bilaabay.

Waxa kale oo uu ka soo shaqeeyey oo uu weriye caan ah ka ahaa Idaacadda BBC-da ee carriga Ingiriiska, 1965kii. Waxa la odhan karaa waxa uu ka mid ahaa dhallin-yaradii dhidibada u taagay Saxaafadda Jamhuuriyaddii Soomaaliyeed. Jeelkii Man-dheera waxa ka sii daayey ciidan SNM ah oo si qarsoodi ah ku galay Jeelka gu'gii 1983-kii. Sidaa ayuu Ismaaciil kaga mid noqday xoogaggii hub-aysnaa ee ciidankii SNM, fadhigooduna ahaa Itoobiya. Sannadkii 1988kii bishii May waxa uu ka mid ahaa ciidankii SNM ee soo weeraray Cadaadlay ilaa Jeelka Mandheera, halkaa ayuu ku dhintay. Markii laga siiddaayey jeelka iyo markii uu weerarka ku soo galay goobtii xaqdarrada loogu xidhay waxa u dhaxaysay lix sannadood. Waxa uu ku dhintay goobtii uu ku xidhnaa, isagoo xor ah ayuu geeriyooday. Ilaahay Naxariistii Janno ha ka waraabiyo.

Waxa kale oo aan u hibaynayaa buuggan, Axmed M Xasan (Axmed-Dheere) oo ka mid ahaa saraakiishii ciidanka cirka Soomaaliyeed. Markay taariikhdu ahayd Julaay 1988-kii waxa uu ka soo duulay xeradii ciidanka cirka ee Balli-doogle, isagoo ku duulayey dayuuradaha dagaalka nooc ka mid ah oo loo yaqaan MIG 17. Waxa lagu soo amray in uu ka qayb-qaato dagaalkii ka socday Hargeysa ee dhexmarayey Ciidamadii daacadda u ahaa xukuumaddii Maxamed S. Barre iyo ciidamadii SNM oo taageero weyn ka haystay shacbiga intoodii badnayd. Sida uu caddeeyey Axmed Dheere, waxa uu sheegay in lagu amray in uu ku garaaco magaalada Hargeysa bambooyin miisaankoodu yahay 500kg.

Axmed waxa uu go'aansaday in aanuu garaacin oo aanuu gumaadin shacbigii uu u dhaartay in uu difaaco. Waxa uu go'aan ku gaadhay in uu u duulo dalka Jabbuuti. Sidaa ayuu yeelay, oo uu Jabbuuti ku tegey isagoo bambooyinkiina ku daadiyey meel aan magaalada ahayn. Dawladdii Jabbuuti ee xilligaa, waxa ay siisay magan-gelyo uu ku joogi karo dalkooda. Muddo yar ka dibna waxa u sii dhaafay dalka Luxemberg. Go'aanka uu qaatay Axmed, waxa uu ahaa kii loo baahnaa, si aanay u dhiman walaalnimadii Soomaalinimo, tii muslinnimo iyo banii'aadamnimo. In badan oo kale waxa ay burbur iyo bara-kac, dhimasho iyo dhaawac ba leh u geysteen dayuuradihii ay ku garaacayeen magaalada dhexdeeda iyo hareereheeda ee maatidu daad-sanayd. Geesinimadaas in la sheegaa waa muhiim, in ay taariikhda gashana waa loo baahanyahay si looga digtoonaado ka qayb-qaadashada gumaadka noocaas ah. Axmed kama soo

jeedin beelihii deegaan ahaa deggenaa Hargeysa iyo Burco ee waxa uu sidaa u yeelay Soomaalinimo ay ku dheehnayd waddaninimo.

## TUSMADA BUUGGA

Hordhac

Gogoldhig

Mahadnaq

Taariikh Guud

Xornimadii Lixdan kii Kadib

Sagaal kii Gu’ ee ugu Horreeyay iyo Saluugii Dad ka

Afgenbigii Milleteriga Ee 21 kii Okt. 1969

Dagaalkii Soomaali Galbeed iyo Saamayn tiisii (1977–78)

Dhacdooyin Muhiim ah oo Saamayn ku Yeeshay Burbur kii Soomaaliweyn

Jabhadihii Hubaysnaa iyo Xukuumaddii M S Barre

Ururkii Dhaqdhaqaaqii Waddaniga Soomaaliyeed (Somali National Movement April 1981— May 1993)

Bilow gii Ku dhawaaqis tii SNM

Aasaas kii SNM iyo Waayihii ku Xeernaa

Saluuggii Shacbiga iyo Kalaqaybsanaantii bulshada.

Heshiis kii Siyaad Barre iyo Mengistu Xayle Mariam

Aragtidii Dhinaca Xukuumaddii M.S.Barre ee Heshiis kii Dhexmaray Itoobiya

Aragtidii Jabhaddii SNM ee Heshiis kii Dhexmaray M.S.Barre iyo Mingiste

Dagaal kii 1988–91: Burco 27 May iyo Hargeysa 31 May

Maanso: Daalaley (1987)

Dagaal kii Burco: 27kii May, Jimce

Dagaal kii Hargeysa: 31 May, 1988

Saamayntii uu ku yeeshay Dalka

Saamayntii uu ku yeeshay dadka.

Xilligii kala guurka ee Jamhuuriyaddii Soomaaliyeed

Xadhiggii Culimada ee Magaalada Muqdisho July 1989

Dagaal kii Xamar 1991 iyo Baxsad kii M.S.Barre

Kudhawaaqistii Jamhuuriyadda Somaliland 18 May, 1991

Dhacdo xusid mudan: Diidmadii Gumaad ka Dad ka Soomaaliyeed iyo Duuliye Axmed Dheere

Sooyaal kii iyo Dareen kii Xanuun ka Lahaa ee Ibraahin Meygaag Samatar Geeridiisii

Gunaanad ka Buugga

Qoraaga Buuggan

Tixraac

# Afeef

Waxa aan ka sii afeef dhiganayaa in buuggan qoraalada ku jiraa ay intooda badani yhiin maqaallo ama qoraallo aan ka qoray cod duuban oo aan dib qoraal ugu rogay. Sidaa awgeed, waxa jirikarta taariikh qaldan oo ku jirta qoraallada. Dabcan waxa aan isku deyey in aan baadho haddii wax qalad ahi ku jiraan ama haddii ay jiraan warbixinno aan sugnayni. Itaalkayga waxa aan isku deyey in aan ka ilaaliyo buugga magacyada beelaha Soomaali-yeed, oo qorayaasha qaar aad u buunbuuniyaan. Waxa aanse diiradda saaray, khilaafaadkii ka dhexdhashay soomaalida dhexdeeda iyo siduu isu soo biirsanayey tan iyo lixdankii. Hawl fudud maaha, in aad wax ka qortaa wixii dhacay 60-kii sannadood ee la soo dhaafay. Waxa sii adkaynaya hawshaa, waa yaraanta qoraalada laga qoray Sooyaalkii Soomaalida.

# Hordhac

Dhacdo kasta, oo soo martay bani-aadamka, waxa ay ka tagtaa saamayn guud ama mid gaar ahaaneed. Ha noqoto mid togan ama mid taban, saamayntaasi ha weynaato ama ha yaraato, waa mid u baahan in la xuso, la fahmo, si looga faa'iidaysto wixii waaya-aragnimo ah ee laga dhaxlay dhacdadaas. Dunida aynu ku noolnahay waxa ay soo martay, heerar kala jaad-jaad ah. Haddii ay tahay dhanka dhaqaalaha, dhanka siyaasadda dhanka diimaha iwm. Markasta jiilka danbe waxa uu dhaxlayey wixii soo maray wuxuuna u sii gudbinayey kuwa ka sii danbeeya. Waaya-aragnimadaasi waxa ay kobcisaa oo dhistaa garaadka qofka. Dhinaca togan uun ma kobciso ee waxa markasta jira, fikir iyo talo taban oo keenta burbur. Waana ta loo baahanyahay in laga digtoonaado. Wax kasta oo dhib iyo dheef lahaa, soona maray bulshada soomaalida ee ku nool Geeska Afrika, lama qorin oo maanta innooma kaydsana.

Dabcan waa ay jiraan wax badan oo laga hayo, nasiib darro ma urursana mana kaydsana. Waxa taa barbar-taalla, in qofba sida uu jecelyahay wax u sheego. Waxaana muhiim ah wixii aadxogogaal u tahay in aad runta ka sheegto, marka aad qorayso. Markaas baa la heli lahaa buugaag iyo qoraallo la tixraaci karo oo dadka danbe u noqon lahaa meel ay ka helaan sawirkooda dadnimo si ay isu daawadaan. Taariikhahaa ama dhacdooyinkaa soo maray dunida ama ilaa maanta dhacaya, marka la qoro maxaa laga faa'iidayaa? Waa weydiin la isweydiin karo.

*In la fahmo qaabkii wax u dhaceen. In la dhuuxo oo la lafaguro qaladaadkii dhacay iyo qaabkay u dhaceen. In laga digtoonaado, oo mar danbe qaladkaa hore u dhacay aan dib*

*loogu noqon. In wixii loo arko faa'iido iyo wanaag, la koriyo lana sii horemariyo markasta*.

Buugga,"Milicsiga dagaalkii dhexmaray SNM iyo Taliskii Maxamed S. Barre" waxa uu si kooban wax innooga sheegayaa, sababihii dhaliyey burburka oo uu ugu muhiimsanaa dagaalkii 1988kii iyo saamayntii uu ku yeeshay dadka Soomaaliyeed guud ahaan. Waxa ku jira buugga qoraallo muhiim ah oo ay qoreen aqoonyahanno iyo xubno xogogaal u ahaa sababihii dhaliyey dagaalkaas. Waxa kale oo aad kula kulmaysaa buugga xubno ka warbixinaya sidii ay u maqleen dagaalkaas iyo saamayntii uu qof ahaan ku yeeshay. Qoranahani, ma dhexgelayo mana ka warramayo qaabkii dagaalku u dhacay, tusaale ahaan: weerarradii, weerar-celiskii, qaab-dagaalkii, dhimashadii, dhaawicii iwm ee kala gaadhay ciidamadii daacadda u ahaa maamulkii Maxamed Siyaad Barre iyo ciidamadii SNM iyo weliba dhibaatadii shacbiga soo gaadhay. Balse, dhiganahani waxa uu si guudmar ah sawir kaaga siinayaa: Maxaa sababay dagaalkaas? Yaa uu dhexmaray dagaalkaasi? Saamayn intee le'eg buu ku yeeshay Jamhuuriyaddii Dimoqraadiga Soomaaliyeed.? Si aynu u helno sawir guud oo faahfaahsan waxa aan weydiimo isu dhow-dhow aan weydiiyey aqoonyahanno iyo siyaasiyiin aan ku tuhmayey in ay si faahfaahsan wax uga odhan karaan weydiimahaas. Si gaar ah waxa aan ula xidhiidhay xubno maamulkii SNM xilligaa ku jiray iyo aqoonyahanno aan ka mid ahayn ururkii SNM. Waxa hubaal ah in aan lagu soo koobi karin buug keliya dareenkii, dagaalkaasi ka tegey iyo qaabkii uu u dhacay ba. Waa hubaal in wax laga qori doono dagaalkaas iyo kuwo kaleba si loo helo buugaag la raad-raaci karo marka loo baahdo. Waxa la isweydiin karaa goorma ayuu dagaalkaasi dhacay? Maalin Jimce ah oo ay bisha May ahayd 27ka, 1988-kii ayuu dagaalkaa bilawgiisii bilaabmay. Subaxnimadii Jimcaha **27/05/1988** ayey reer Burco ku soo tooseen dagaal aanay hore warkiisa u hayn. Dagaal aan ka soo bilaabmin

Soohdimaha aynu la leenahay Itoobiya. Waxa uu ahaa dagaal ku cusub dhammaan dadka shacbi iyo ciidanba. Magaalada Hargeysa oo ahayd caasimaddii labaad ee Jamhuuriyaddii Soomaaliyeed, baa iyana, goor habeenka qaarkiisii danbe ah gariirka madaafiicdu isqabsatay.

Habeen kaa oo taariikh du ahayd 31/05/1988/ maalin Salaasa ah. Labadaa dagaal kadib waxa u bilaabantay, Jamhuuriyaddii Soomaaliyeed weji cusub. Saamayn-ta dagaal-kaasi keenay waxa ka mid ahaa, in dagaalkii ku fiday dhammaan deegaankii Jamhuuriyaddii Soomaaliyeed. Waxa la aasaasay USC (United Somali Congress) 1989-kii oo dagaalkii sii labanlaabay, kana bilaabay deegaanada ku xeeran magaalo-madaxdii dalka oo ahayd Muqdisho. Bishii Jeenaweri ee sannadkii 1991-kii, ayuu Maxamed Siyaad Barre ka hulleelay xaruntii Madaxtooyada ee ku taallay Muqdisho. Markay taariikhdu ahayd 18/05/1991 ayaa Jamhuuriyadda Somaliland lagaga dhawaaqay magaalada Burco. Isbeddeladaasi waxa ay ku wada arooraan, dagaalkii 1988kii.

*Sayid-Axmed Maxamed Yuusuf (Dhegey)*

# Gogoldhig

*Fu'aad Sh. Abuubakar*

Taariikhda bulsho kasta in la qoro oo la ururiyo waa guul. Hawl fudud maaha, waana sababta keenta in ay had iyo jeer noqoto gudashada hawshaasi xil dawladeed. Waxaase ayaandarro timaadaa markay muuqan waydo dawlad u heelan fulinta hawshaa. Markan weeye xilliga la arko qof ama koox yar oo is xilqaanta si ay baylahdaa wax uga qabtaan. Qoraha buuggani "Milicsiga Dagaalkii 1988kii" qalin adeegsiga kuma cusba, kana maaha buuggii ugu horeeyey ee uu taariikhdan bulshadeena ku soo bandhigo. Hore ayuu ilaa laba buug oo si qoto dheer uga warramaya taariikhdii bulshada Soomaaliland soo ban-dhigay.

Wuxuu qorahani ka mid yahay tiro kooban oo qalinka u adeegsada inay xoogga saaraan in taariikhda bulshada Soomaaliland loogu adeego. Qoruhu waa Sayid-Axmed M. Yuusuf. In badan baan ku kulanay goob mareegeed lagaga hadlayo sidii taariikhda ummadeena loo kaydin lahaa dhigaalna loogu soo bandhigi lahaa.

Buuggan uu qoruhu summad baadisooc uga dhigay"Milicsiga dagaalkii 1988kii"waa mid aad loogu baahnaa xilligan aynu ku jirno oo laga soo fogaanayo dagaalkii 1988 oo halgan ummadeed ahaa. Buuggan wuxuu qoruhu si dul ka hoorismo ah akhristaha ugu deeqayaa taariikh kooban oo ku saabsan bar bilawgii halgankii ummadeed. Waxaa guushaa ugu horraysay loo tiriyaa inay hanoqaadey 26 juun 1960, hase yeeshee waxaa la boqnogooyey dhawr cisho ka dib loona sadqeeyey abuurista waxa loogu yeedhay "midnimo laba dal" si ay sal ugu noqoto midnimada shantii Soomaali-yeed. Siddeeddii sanno

ee hore ee xukuumadihii rayidku waxay qayb libaax ka qaateen muujinta iyo soo bandhigida gefafkii la galay xillligii iskudarka.

Waxaase midnimadaa tukubaysay si hagar la’aaneed u sii boqno gooyey maamulkii Milatariga ahaa. Waxaase buuggani si mug leh u soo bandhigayaa dhacdadii uu qoruhu qalinka u qaatey kuna xardhan summad tilmaameedka buugga oo ah xilligii halgankii ummadu xadh-kaha goostay si laxaad lehna u xuubsiibtay waa 1988. Wuxuu qoruhu inala wadaagayaa dhinacyo dhawr ah oo halgankaasi ka helay taageero dhaqaale, ciidameed, siyaasadeed iwm.

Waa buug dhaxalgal ah lehna mudnaantiisaa gaar ahaaneed. Iyadoon kolna akhris laga gayoonayn ayey wanaagsan tahay in kayd iyo tixraac loo haysto. Waa weel dhan oo la dhigto guriga kuguna beeraya inuu mar walba kuu cusboonaysiiyo xusuustaada ku aadan dhacdadaa 1988. Tani waxay sugaysaa in loo heegan ahaado heegomuuqdheer (Soomaaliland) horumarkeeda iyo ilaalinteeda.

Heegomuuqdheer, Maxaa dhiig loo daadshay! Maxaa naf loo huray! Maxaa laxaad loo naafeeyey! Maxaa carruur loo agoomeeyey! Maxaa dan gaar loo dayacay! Maxaa waqti loo huray! Maxaa hiil iyo hooba la isla garab taagey! Intaa iyo in ka badan ayuu buuggani maanka ku doojinayaa. Waxaa kale oo buuggani mudnaan siiyey inuu xuso mujaahid Ibraahin Maygaag Samater IHUN oo kolkay taariikhdu ahayd 31-01-2011 ku geeriyooday dalka Japan. Ibraahin Maygaag Samater wuxuu ka mid ahaa dadka faro-ku-tiriska ah ee Maandeeq milgaheega u huray dhammaan aqoon, waqti, hanti, qalin, qori, iwm. Ibraahin Maygaag Samater wuxuu danta guud u sadqeeyey dantiisa gaar ahaaneed.

*Fu’aad Sheekh Abuubakar*
*MATC (Milwaukee Area Technical College, USA)*

*Waxa uu muddo dheer macallin ka ahaa, dugsiga kor ku xusan.*
*Waa aasaasihii, barta Internetka ee Farshaxan*
*Diyaariyaha barnaamijka Dharaarihii tilmaannaa.*
*Qoraa qoray, maqaallo aad u tiro badan, oo inta badan diiradda saara*
*Sooyaalkii soomaalidu soo martay*

# Mahadnaq

Marka hore Ilaahay baa mahad leh. Dadka intii igu dhiirrigelisay ama si uun uga qaybqaatay suurtagalnimada in uu buuggani soo baxao iyagana waan u mahadnaqayaa. Kollay waxa jira hawl kasta oo qof qabto dad aad ugu dhowaa hawshaas oo gacan weyn ka geysta. Waxa aan jecelahay in aan qormadan mahadnaqa aan ku xuso dhowrkaa qof.

Xasan Cabdi Madar, oo ah qoraa had iyo jeer ku dedaala sidii uu u soo saari lahaa buugaag ama qoraalo isugu jira wacyigelin, dhiirrigelin, barbaarin iyo dhammaan laamaha bulshada. Xasan, xilligan uu buuggani soo baxay waxa uu hayaa xilka, Agaasimaha Wasaaradda Madaxtooyada Somaliland. Waxa uu ii huray wakhtigiisa qaaliga ah. Isagoo soo akhriyey, talooyin wax ku ool ahna iga siiyey soona saxay. Gacanna ka geystay soo bixidda buugga./ Somaliland

Khaalid Jaamac Qodax, qoraa, dhaqaale yahan, deggen Hargeysa. Had iyo jeer u heellan kobcinta iyo kor u qaadidda Af soomaaliga iyo erayga qoran. Buuggan daabacaaddiisa labaad, gacanweyn ayuu ka geystay. Sixitaanka iyo talooyin farabadan oo uu ka bixiyey daabacaaddii hore, oo aan qaatay. Habaynta iyo hufidda danbe Khaalid waxa uu iga mudanyahay mahadnaq gaar ah./Somaliland

Mustafe Adan Nuur, qoraa, aqoonyahan, had iyo jeer taageera ereyga qoran. Waxa uu si mug leh u soo akhriyey buuggan, isagoo talooyinna iga siiyey qoraallada qaar ka mid ah. Waxa uu tifaftiray buugga dhammaantii. Taasoo ah hawl aan yarayn, oo aanan marnaba illoobi doonin, sida

wanaagsan ee uu iiga taageeray hufiddii iyo kala haadintii buugga ee kama danbaysta ahayd./ UK

Prof: Cabdisalaan Yaasiin Maxamed, oo muddo ka ahaa guddoomiye jaamacadda Burco, xubinna ka ahaa shirguddoonkii ku dhowaaqay SNM 1981kii. Meelo badan ayuu ila saxay, isagoo markasta ii muujinayey in uu igu caawiyo wixii taariikh ah ee ku saabsanaa bilawgii SNM, isagoo aad mashquul u ahaa haddana waxaanaan illoobayn sida uu ii dhiirrigeliyey. Beryahan danbe waxa uu ka mid yahay maamulka Jaamacadda Hargeysa.

Cabdalle Xaaji Cusmaan., oo ah aqoonyahan reer Jabuuti ah, taariikhyahan si gaar ah u ururiya una kaydiya suugaanta, taariikhda iyo fanka soomaalida. Waxa uu iigu deeqay wakhtigiisa qaaliga ah in uu iigu soo diyaariyo qoraal uu ku eegay sababihii keenay dagaalkii 1988kii, si guudmar ah./ Jabbuuti

Faysal Axmed Xaaji Aadan, macallinkaygii dugsigii sare ee Sheekh. Waxa uu ka mid ahaa dagaalyahannadii muddada dheer ku soo jiray halgankii lagaga soo horjeeday xukuumaddii kelitaliska ahayd. Waxa uu Faysal ii huray wakhtigiisa qaaliga ah, wuxuuna ii soo diyaariyey qoraal uu ku faahfaahinayo asbaabihii ku qanciyey in uu halgankaas ku biiro./Somaliland

Muuse Maxamuud Ciise (Dalmar). Guddoomiyaha, Naadiga Akhrisa Stockholm. Qoraa, maansoyahan, u taagan horumarinta fanka iyo suugaanta. Waxa uuna ka mid yahay weriyayaasha ka hawl gala idaacadda Iswidhan, laanteeda afsoomaaliga (Radio Sweden) /Iswidhan

Shawqi Maxamed Saalax, oo xubin ka ah Naadiga Akhriska Stockholm, waxa uu gacan iga siiyey qaybo muhiim ah in uu

gacantiisa ku qoro. Taasoo aad iigu fududaysay garaaciddii buugga./Iswidhan

Maxamed Xirsi Guuleed, Gabayaa, Qoraa qoray buugaag badan, deggen Stockholm. Waxa uu gacan ka geystay farsamo ahaan buugga./Iswidhan

Xirsi Cali Xaaji Xasan, Wasiirka Madaxtooyada Somaliland, ee xilligan buuggu soo baxay, waxa uu dhiirrigeliyaa inta badan buugaagta in la qoro. Waxa uu dareensanyahay erayga qorani in uu yahay dhigaal dhaxalgal ah. Waxa uu ka mid ahaa dadkii soo dhoweeyey soo bixidda buuggan gacanweyn na ka geystay daabacaadda buugga. /Somaliland

Xubnahan soo socda waxa aanaan marnaba illoobi Karin sidii ay iigu soo diyaariyeen qaybta warbixinta dareenkii iyo saamayntii dagaalkii 1988kii. Xubnahaasina waxa ay kala yihiin: Foosiya Axmed Maxamed /Burco, Siciid Cabdilaahi Xuseen/UK, Cabdi Cabdilaahi Aadan/Kanada, Kamaal Cabdilaahi Xuseen/USA. Sahra Axmed (Halgan) /Faransiiska. Cabdirasaaq Sh. Ibraahin Kooshin (Alfo) /UK, Yaasiin M. Yuusuf /Hargeysa

# 1

# Taariikh Guud

*" Isbeddeladii siyaasiga ahaa ee ka dhacay deegaanka soomaalidu degto intii ka danbaysay dagaal-kii Labaad ee dunida (1939–1945)*



Dhismaha halkaa ka muuqda waxa loo yaqaan taallada Cumar-kujoog[2].

Marka aad dib u milicsato sooyaalka taariikheed ee dadka Soomaalidu soo martay, waxa aad arkaysaa ama fahmaysaa in isbeddello waaweyni dhaceen xilli ku beegan dagaalkii II-aad ee dunida. Dhammaadkii sannad kii 1940-kii buu Talyaanigu soo weeraray Maxmiyaddii uu ilaalin jiray Ingiriisku oo loo yaqaannay"Soomaaliland Protectorate" oo uu qabsaday. Talyaanigu waxa uu ku koobnaa xilligaa oo uu maamuli jirey Soomaaliya. Muddo lix bilood ah ayuu gacanta ku hayey Somaliland. Xilligaasi waa markii dagaalkii labaad ka holcayey Yurub iyo meelo kaleba. Xilligaa

Talyaaniga waxa gacanta ku hayey xisbigii la odhanjiray”Partito Nazionale Fascista” (National Fascist Party) oo uu hoggaaminayey Benito Mussolini.

…Maamulkii Talyaaniga iyo maamulkii Jarmalka oo uu hoggaaminayey Adolf Hitler ee xisbigiisii Naziga, waxa dhexmaray heshiis. Maaddaama uu Hitler hoggaaminayey xisbigii ugu xoogga weynaa Yurub oo dhan, waxa uu Talyaanigu ka helay Jarmalka taageero siyaasadeed, halka Faransiiska iyo Ingiriiska aanu marnaba heshiis xor ahi dhexmarin. Taasi waxa ay kicisay dareenkii maamulkii Talyaaniga oo ku hammiyey in uu dhul-ballaadhsi sameeyo. Waa Sababta keentay qabsiga Talyaanigu qabsaday Somaliland. Xisbigii Naasiga iyo xisbiga Fashista waxa ka dhexeeyey mabda’a kala soocidda dadka, oo loo kala saarayey dad dhalad ah iyo gun. Kala soocidda jaadkaas ahi waxa ay dadka madaw kasii dhigaysay in ay yihiin dadka ugu liita. Sidaa daraadeed Talyaanigu waxa uu ku hayey dhulkii uu ka talinayey, cadaadis aad u xooggan, kala soocid uu kala soocayey dadka, xasuuq iyo gumaad aad u ballaadhan. Bishii Jeenawari 1941kii[3] horraantiisii ayuu Ingiriisku weerar ku soo qaaday Talyaanigii fadhiyey Soomaaliya iyo Somaliland, oo uu ka soo weeraray dhanka badda Gacanka Cadmeed iyo dhinaca Kiiniya oo uu horeba gacanta ugu hayey. Dagaalkaas Ingiriisku waa uu ku guulaystay oo waxa gacantiisa galay dhammaan deegaan-kii Soomaaliyeed oo dhan marka laga reebo Xeeb ta Jabbuuti oo Faransiis-ku ka talinayey.



Charles de Gaulle[4]

Dhanka Faransiiska waxa qabsaday Jarmalka, oo halkaa ka dhisay Dawlad, isaga taageersan. Sannadkii 1940-kii **Charles de Gaulle** oo markaa noqday Jeneraal, baa kaga dhowaaqay London oo uu megangelyo u joogay jabhad lagu magacaabo ”Dib u Xoraynta Faransiiska”. Jabhaddaas oo uu aqoonsaday Ingiriisku, oo uu taageero af iyo addin ah la garabgalay. Dalalka kala ah Maraykan-ka, Ruushka, Ingiriiska iyo Jabhaddii Dib u Xoraynta Faransiisku waxa ay samaysteen Xulafo dagaal oo ay kaga soo horjeedaan Jarmalka iyo intii la safatay sida Talyaaniga. Haddii Faransiiskii uu u gacangalay Jarmal kii, waxa isweydiin leh maamulkii Jabuuti ee Faransiisku dhankee buu taageeray? Waxa uu taageeray maamulkii laga dhisay Faransiiska ee taageersanaa Jarmalka. Taasi waxa ay keentay in Ingiriiska oo maamulayey deegaanka ku xeeran Jabbuuti, uu ku soo rogay cunaqabatayn saamaysay xatadadkii shicibka ahaa ee reer Jabbuuti. Jenaral, de Gaulle waxa uu ku soo guryo-noqday dalkiisii hooyo 1944-kii. Sannadkii 1945-kii waxa la jebiyey oo si buuxda looga adkaaday Jarmalkii iyo

xulafadiisii oo uu Talyaanigu ka mid ahaa. Dagaalkii labaad ee dunidu markii uu dhammaaday waxa bilaabantay siyaasad cusub oo ay la soo baxeen xoogaggii ku guulaystay dagaal-ka. Markay taariikhdu ahayd 24 October 1945,[5] baa si guud ahaaneed loo shaaciyey in la aasaasay Qaramada midoobay *(United Nations)*. 50 dal baa bilawgii saxeexay jiritaanka Qaramada midoobay. Aasaaska Qaramada Midoobay, dalalka Afrikaanku intooda badani kamay qaybgelin, sababtoo ahayd, iyaga oo ku hoos jiray maamullo kale oo reer Yurub ah. Wejiga cusub ee bilaabmay waxa uu noqday.

In ay awood gaar ah yeeshaan afartii dal ee ku guulaystay dagaalkii labaad sida: Faransiiska, Ingiriiska, Ruushka iyo Maraykanka (USA). Awooddaa oo ay ugu wanqaleen, awoodda”Diidmada Qayaxan”[6] oo ah in ay wixii ay doonaan diidikaraan oo aan cidina ka daba hadli karin. Waxa samaysmay laba Xulafo oo waaweyn; Ta Bari oo uu hoggaaminayey dalkii la odhan jiray USSR (Ruushka) iyo Ta Galbeed oo uu hoggaaminayey Maraykanku (USA).



*Winston Churchill (1870–1965)*[7]

Arrimaha bilawgiiba, laga wada hadlay, waxa ka mid ahaa sooh-dimaha deegaanka Soomaalida. Xoghayihii Arrimaha dibedda ee Ingiriiska Ernest Bevin, baa sannadkii 1946-kii soo jeediyey in dhulka soomaalida oo dhan la hoos geeyo Qaramada midoobay oo uu Ingiriisku wakiil uga yahay. Soo jeedintaa oo ay ku jireen dhammaan dhulka Soomaalidu degto marka laga reebo Jabbuuti oo Faransiisku gacanta ku hayey, waxa maamulkeeda hayey dawladdii Ingiriiska. Laakiin, soo jeedintaasi ma ay noqon mid sii jirta, markiiba qorshe kale ayaa laga dulkeenay, oo si qarsoon loo soo habeeyey.



Ernest Bevin[8], (1945–1951) Xoghayihii arrimaha dibedda ee Ingiriiska

Qorshahaa danbe waxa uu ku doodayey in la raaco heshiiskii 1897-kii. Heshiiskaa oo ay wada galeen boqoraddii Ingiriiska ee la odhan jiray Victoria iyo boqorkii Axmaarada ee Mnelik II. Waxa aad ka soo qaaddaa, in lagu dul-shaxay, oo aanay Soomaalidu waxba ka fahamsanayn xilligaa, xeeladihii ka dhexsocday dalal kii reer Galbeedka oo markaa gacanta ku hayey dalalka Afrika, intooda badan. Xilligii Ingiriisku maamulayey Soomaaliya ee uu ka qabsaday

Talyaaniga, waxa la aasaasay Xisbigii, Somali Youth League (SYL), sannadkii 1947-kii. Waxa uu xisbigu doonayey in la dhiso maamul soomaalidu gaar u tahay oo deegaanka soomaalida oo dhan laga dhiso. Laakiin, rabitaankaasi, waxa uu isu rogay qaab aanay markaa iyagu awood u lahayn. Tusaale, markii ay dedaalkaa bilaabeen, waxa uu dhanka kale, Talyaanigu ugu jiray dedaal xooggan sidii gacantiisa loogu soo celin lahaa Somaliya oo keliya, mar kale. Waxa taa barbar-taallay in Ingiriiskuna dhanka kale ka sii furfurayey deegaankii u gacangalay dagaalkii labaad ee dunida. Markiiba Ingiriisku waxa uu ku celiyey Itoobiya deegaanka Ogadeeniya. Sannadkii 1954kii na waxa uu ku wareejiyey, Xayle Salaase deegaanka Reserved Area iyo Hawd,[9] oo labaduba ka tirsanaayeen deegaanka Somaali-galbeed. Dhinaca kalena Talyaaniga oo si xooggan uga hortegay, fikraddii SYL, baa ku guulaystay in dib loogu soo celiyo maamulkii Soomaali-ya. Talyaanigu waxa uu ka faa’iidaystay fahamla’aantii dadka iyo isaga oo adeegsaday xubnihii aadka ugu dhowaa ee la shaqayn jiray. Taasina waxa ay keentay in la hakiyo dedaalkii SYL, ee xoogganaa, kuna fidayey dhulka soomaalida oo dhan. Waxa kale oo uu Talyaanigu ballanqaaday in uu raaci doono sida ay, Qaramada Midoobay ugu qorsheeyeen qaadashada xorriyadda Soomaaliya, oo loo cayimay 01/07/1960.

Dawladda Masar baa ka mid ahayd dalalkii aad u danaynayey ismaamulka soomaalida. Sidaa awgeed, bay u soo dirteen Ergay gaar u ahaa arrimaha Soomaalida, oo la odhan jiray Kamaaludiin Saalax. Maaddaama oo xilligaa (kontomaadkii), ay socotay siyaasado kala jiidasho ah. Kamaaluddiin waa la dilay, waxa loo aaneeyaa in gacan-ku-dhiiglaha dilay uu ahaa soomaali. Ninka toorreyda ku dilay Kamaaluddiin, oo la odhan jiray Wiilow, waxa si tuhun ah oo aan caddayn loogu eedeeyaa in uu wax ka ogaa taliyihii saldhigga booliska Muqdisho oo ahaa Dhamme, Maxamed Siyaad Barre[10].

Waxa kaloo la sheegay, in uu Maxamed Siyaad Barre markii uu xukunka xoogga ku qabsaday u diray ciiddan maxkamaddii Banaadir, halkaana ay ka soo qaadeen faylkii dacwaddii dilkii Kamaaludiin.[11]Mar uu, Abwaan, Cabdilaahi Suldaan Timacadde gabay ku soo daray marxuumka waa kii lahaa:

*"Kamaaluddiin-ba qaar-baw gabbaday, qaatay giniyaade"*.

**Maxaa loo dilay Kamaaluddiin Saalax?** lHN Kamaaluddiin waxa uu ka mid ahaa wakiiladii loo xilsaaray ka warhaynta maamulkii Talyaaniga ee sida qalloocda ugu soo noqday hoggaankii Soomaaliya. Maadaama oo Talyaaniga uu Ingiriisku ka qabsaday Soomaaliya 1941-kii. Soo noqodkii Talyaaniga waxa fududeeyey dad Soomaaliyeed oo uu u adeegsaday in ay sidaa doortaan. Waxaana burburay Xisbigii SYL, oo ku danbeeyey gacan uu Talyaanigu hoggaamiyo. Haddaba Kamaaluddiin Saalax, waxa uu diiday qorshayaal uu watay Talyaanigu, sababtaa ayaa loo maleeyaa in uu talyaanigu ka danbeeyey dilkiisa.[12] Waana halka aad ogaan karto ilaa manta, dadka Soomaaliyeed waxa ka dhaadhacsan in maamulkii Talyaaniga xorriyad laga qaatay. Talyaaniga xorriyad Soomaaliya kamay qaadan, ee UN-ta ayaa maamulka Soomaaliya gacanta ku haysay.

Dhinaca Somaliland, waxa ka bilaabmay halgan lagu doonayey in uu Ingiriisku ka baxo dalka. Waxa taa barbarsocotay dareen ahaa in la doono Soomaaliweyn.

Somaliland waxaa ka bilowday dhaqdhaqaaqyo xornimo doon ah. Waxay ahaayeen kuwii ugu horreeyay ee si nidaamsan uga horyimaadda gumaystaha. Ururadaa oo leh taariikh dheer oo ku lammaan sidii ay ku bilowdeen iyo sidaanay ku taabogelin waxaa ka mid ahaa:

1. Somali Islamic Association 1920 waxaa hoggaamin jiray oo aasaasay Farax Oomar
2. Seaman's Union 1931. Ururkanna waxaa aasaasay badmaaxyadii reer Somaliland oo waddan kana soo gaadhi jiray, gumaystahana la shaqayn jiray.
3. 1935 Somali Official Union.

Markay taariikhdu ahayd, 22-01-1952[13] baa lagu dhowaaqay Xisbigii SNL (Somali National League) oo noqday kii hoggaanka u qabtay siyaasaddii gobanimodoonka ee Somaliland. Inkastoo uu xisbigii SYL (Somali Youth League) xafiisyo ka furtay Somaliland, laakiin ma uu noqon mid sii hana qaada, oo hela taageerayaal. Waxa kale oo ka hana qaaday Somaliland laba xisbi oo kale, oo kala ahaa NUF (National United Front) iyo USP (United Somali Party). Taageeradii ugu ballaadhnayd waxa helay, Xisbiga SNL uu ka helay taageeradii bulshada inteedii badnayd, kuna guulaystay 20 kursi baarlamaankii ugu horreeyey ee Somaliland. Waxa taariikhda laga dheehan karaa in Xisbigii SYL iyo dedaalkiisiiba uu dhaawacay Talyaaniga oo dib ugu soo noqday maamulkii Soomaaliya. Dabcan, Talyaanigu waa kii laga xoraynayey, mana ay ahayn in uu dib ugu soo noqdo saaxadda siyaasadda Soomaalida. Ku soo noqoshada Talyaanigu ku soo noqday maamulkii Somaliya, waxa ay dhabar-jab ku ahayd raadintii Somaliweyn. Waxa kale oo ay ahayd qalad aad u dhaawacay, sooyaalkii siyaasadda soomaalida ee bilawga ahaa. Talyaaniga oo ahaa maamulkii ka talinayey ***"Somalia Italiana"*** muddo ka badan 80 sannadood. Xisbigii Fashiistaha waxa hoggaamin jirey Benito Musselini, oo xisbiga horjooge ka ahaa tan iyo 1922kii[14]. Xisbigaasi waxa uu dad-ka soomaalida gaadhsiiyey dhibaato farabadan oo dil, kufsi iyo dhacba leh. Xisbigaas oo aan qarsan jirin cunsurinimada uu dadka madaw u hayey. Mar haddii laga adkaaday Xisbigaas, oo maamulkii uu ka wareegay Talyaanigii, kuna wareegay Ingiriiska, mar-naba in uu soo noqdaa ma ay ahayn fikrad qumman. Haba soo

noqdee, in Talyaanigu ahaado saaxiibka koowaad ee Soomaalida, waxa ay ahayd siyaasad qalloocda. Halkii, maxkamad laga saari lahaa ciidamadii iyo siyaasiyiintii Talyaaniga ee dalka ku sugnaa, baa sacabka loo tumay sidii uu dalka u maamuli lahaa. Waxa la isweydiin karaa, yaa laga xoraynayey Soomaaliya? Talyaani, Ingiriis mise Qaramada-midoobay ee 1960-kii gacanta ku haysey Soomaaliya?. Magacii xilligaa loo yaqaanay Somaliyana waxa uu ahaa**”Trust Territory of Somalia”.** Waxa sheegid mudan, in bulshaweyn-ta Soomaaliyeed ee reer Soomali-ya aanay, oggolayn soo noqoshada talyaaniga, gaar ahaan SYL bilawgeedii hore.

Sannadkii 1960-kii, waxa la soo gaadhay isku darsigii….Somaliland iyo Soomaaliya. Intii aan isku darsigu dhicin baa bishii feberweri 1960kii Somaliland, waxa ka dhacday doorasho. Waxa ku guulaystay xisbigii SNL oo ay la tartameen SYL, USP iyo NUF. Kuraasta oo ahayd 33 kursi waxa ay u kala heleen sidan: SNL 20 kursi, SYL 0 kursi, USP 12 kursi iyo NUF 1 kursi[15]. Labada xisbi ee helay aqlabiyadda oo kala ahaa SNL iyo USP waxa ka go’nayd in bilaa shuruud loogu tago Somaliya. Sidii baa lagu tegey oo lagala qayb galay debbaaldeggii xorriyaddii Somaliya 01/07/1960-kii. Isla maalintaa ayaa loo aqoonsaday israacii labada dal. Waxa isweydiin leh, Maxaa israacay? Ma uu jirin, kulan labada dal ay ku wada hadleen oo ka wada doodeen siyaasadda soomaalida, guud ahaan iyo labadoodu qaabka ay isu raacayeen oo go’aamo la gaadhay. Taasi waa ta markiiba dhalisay tuhunka iyo kala fiigidda labada bulsho Somaliland iyo Soomaaliya.

Dhinaca kale waxa markiiba bilaabmay murankii waqooyiga Kenya (NFD) oo Ingiriisku gacanta ku hayey. Hawshaas oo aan loo yaraysan, xataa afti laga qaaday dadkii dhulkaa deggenaa. Laakiin Ingiriisku waxa uu si aan gabbasho lahayn u hor istaagay in goboladaasi soo raacaan jamhuuriyaddii loo bixiyey ”Jamhuuriyadda Soomaaliyeed”